

# Qiimeynta Bay'adeed

SI KOOBAN



B R T

## Mashruuca Basaska Rush Line BRT

Mashruuca Rush Line Bus Rapid Transit (BRT) waa Mashruuc ah baska saxmadda oo ah 15-mayl oo isku xiri doona bartamaha magaalada Saint Paul iyo Saint Paul East Side, Maplewood, White Bear Township, Vadnais Heights, Gem Lake iyo White Bear Lake. Ujeeddada Mashruuca Rush Line BRT waa gaadiid dadweyne oo daboolaya dhaqdhaqaaqa muddada-dheer ee isu-socodka gobolka iyo baahiyaha ganacsiyada iyo dadweynaha raacaya si loogu taageero horumar waara oo lagu soo ogaaday daraasad ahaan.

Baska Rush Line BRT waxa uu fursado cusub u yahay dadka deegaanka, shaqaalaha iyo milkiilayaasha meheradaha iyada oo la xoojinayo iskuxirka magaalada woqooyigeeda-bari oo laga diyaarinayo 21 boosteejo oo laga heli doono adeeg buuxa iyo adeeg maalinle ah, toddobada maalmood ee usbuucii. Iyada oo qeyb ka ah shabakadda gaadiidka MAGAALO-WEYNTA oo ah heer gobol, Rush Line BRT waxay isku xiri doontaa dadka u kala socda gobolka oo dhan xarumaha shaqada, goobaha deegaanka, boosteejooyinka gaadiidka dadweynaha iyo meelaha muhiimka ah oo dhan ee ku teedsan marinka mashruuca. Rush Line BRT waxaa la filayaa in dhismihiisa la bilaabo sannadka 2024 oo uu hawlgalo sannadka 2026.

## Waa Maxay Qiimeynta Bay'adeed?

Qiimeynta Bay'adeed waa warbixin sharaxysa sababta mashruuca loogu baahan yahay iyo habka loo isticmaali doono in lagu qeexo wax lagu beddelan karo. Qiimeynta Deegaanka waxay soo koobeysaa faa'iidooyinka iyo saameynta laga filan karo mashruuca la soo jeediyey iyadoo la raacayo qawaaniinta lagu aasaasay Sharciga Maamulka Bay'adda Qaranka iyo Sharciga Maamulka Bay'adda ee Minnesota. Ujeeddada warbixintan hadda ah waa:

- Qiimeynta faa'iidooyinka bay'adda, bulshada, dhaqaalaha iyo gaadiidka iyo saameynta dhisidda iyo hawlgalka mashruuca oo ay la socoto mashaariic kale oo ah kuwa la soo dhaafay, kuwa hadda socda iyo kuwa qorsheysan.
- Ka sii feker si looga leexdo, si loo yareeyo oo aan loogu habsaamin saameynta.
- Hubso in mashruucu waafaqsan yahay sharciyada gobolka iyo kuwa dowladda federaalka.

Iyada oo qeyb ka ah qiimeynta kheyraadka iyo taariikhiga ah (oo loo tixraacayo Sharciga habraaca 106), waxaa la diyaariyey Qabyqoraal Is-afgarad ah Heshiis oo lagu caddeynayo sida wax looga qaban doono saameynta daran ee kheyraadka dhaqan ahaaneed iyo taariikh ahaaneed si looga hadlo inta mashruucu socdo. Waraaqdan waxaa la socda Qiimeynta Bay'adeed si ay dadku u akhristaan oo uga hadlaan.



Intii lagu soo jiray sameyntii Qiimeynta Bay'adeed, degmada Ramsey County waxay qiimeysay faa'iidada mashruuca iyo saameynta uu leeyahay:

- Tayada hawada
- Beeraha nasashada
- Meheradaha
- Xayawaanka la dhowro ama gabaabsiga ah
- Goobaha Dadweynaha
- Guryaha dowladda iyo dadweynaha
- Dhismaha
- Badqabidda
- Meelaha wasakhoobaya
- Basaska Iskuulka
- Guryaha taariikhiga ah
- Saameynta muuqata
- Isticmaalka dhulka
- Biyaha
- Qeylada dhismaha
- Goobaha Duurjoogta

## Sidee Baan Uga Qeybqaadan Karaa Qiimeynta Bay'adeed?

Qiimeynta Bay'adeed waa la daabacayaa si ay u akhristaan dadweynaha iyo sidoo kale hay'adaha kale ee federaalka, gobolka iyo kuwa deegaanka ah. Dadweynuhu waxay fursad u heli doonaan in ay fikradahooda ku soo dhiibtaan xilliga loo qabto, laga bilaabo May 11, 2021 ilaa dhammaadka June 25, 2021.

Xilliga loo qabto waa in ay dadweynuhu fikradahooda noogu soo gudbiyaan ([info@rushline.org](mailto:info@rushline.org)), boosto ahaan (15 West Kellogg Boulevard, Suite 210, Saint Paul, MN 55102) ama barta intarnetka ee mashruuca oo ah [rushline.org](http://rushline.org). Talooyin ku saabsan soo-gudbinta fikradaha ayaa la soo geliyaa barta intarnetka. Waraaqaha waxaa laga heli doonaa barta intarnetka iyo goobaha dadweynuhu isugu yimaado meel kasta marinka oo dhan (meelaha laga helayo ka eego [rushline.org](http://rushline.org)). Fikradaha dadweynaha oo dhan waxaa la socon doona Maamulka Gaadiidka Dadweynaha ee Federaalka iyo Degmada Ramsey County, oo ah hay'adaha hoggaanka u haysa federaalka iyo kuwa kale ee deegaanka ee Mashruuca Rush Line BRT. Fikradah muhiimka ah waxaa jawaabahooda lagu soo qori doonaa waraaqaha go'aanka bay'adda oo la soo saari doono ka dib marka la soo gabagabeeyo helidda fikradaha dadweynaha.

Fadlan ka soo qeybgal mid ka mid ah saddex kulan oo loo qaban doono dadweynaha. Fadlan kala soco wixii macluumaad ah [rushline.org](http://rushline.org) oo ka soo qeybgal kulamada dadweynaha oo lagu qabanayo fogaan-arag ah intarnetka.




**Kulan dadweyne oo ah iska soo gal wakhtigaad rabto:**

- 12-ka ilaa 1:30 duhurnimo, Arbaco, 2-da Juun
- 5:30 ilaa 7-da fiidnimo, Khamiista, 3-da Juun



**Guriga furan ee qof-ahaaneed:** tag wakhti kasta inta u dhexeysa 4-ta pm ilaa 7-da fiidnimo, Khamiista, 17-ka Juun Union Depot, 214 4th Street East, Saint Paul, MN 55101

## Sidee Ayey Qiimeynta Ea Ugu Habboon Tahay Habka Qaadashada Go'aanka?



## La Soco Xogta Arrimaha Mashruuca

Wixii fikrado ah waxaa lag soo gudbin karaa sida kor ku qoran. Si aad mashruuca uga war hayso oo haddii aad rabto aad su'aalo u soo weydiiso dhinacyada kale ee mashruuca ku hawlan, waxaad noo qori kartaa boostadaada intarnetka (email), oo waxaad nagala socon kartaa warbaahinta bulshada ama toos noola soo xiriir.

- Rukumo inaad boostada inarnetka ku hesho fariimo: [rushline.org](http://rushline.org)
- Nagala soo xiriir: [info@rushline.org](mailto:info@rushline.org)
- La soo hadal maamulaha mashruuca Andy Gitzlaff: **651-266-2772**

**Nagala soco:**

- [@rushlinetransit](https://twitter.com/rushlinetransit)
- [facebook.com/rushline](https://facebook.com/rushline)